

## Arin

Markay arintu joogto waayeenimo, inta badan reer Canada wax kale maahee waa ammaan. In ka badan 11 milyan oo ah shaqaale ku nool Canada ma haystaan meelo shaqo oo leh xaqsiin hawlgabnimo. In ka badan saddex u dhig labo reer Canada ah oo xaq u leh inay wax ku darsadaan RRSP ayaan dhab ahaantii sidaa samaynayn. Celcelis kaydada RRSP ee 55-64 jir ayaa ah \$55,000 oo keliya. Xaqiiqadii, qiyaastii saddex-udhig labo qoysaska reer Canada wax ku filaan uma kaydsadaan hawlgabkooda.

## XAALAD

Qorshayaalka Hawlgabka ee Canada (CPP), Ammaanka Da'da Weyn (OAS) iyo Dakhli loo Ballanqaaday Siyaadada ee loogu talo galay waayeelka uu dakhligoodu yar yahay (GIS) waa mid muhim u ah xaqsiinta caamka ah iyo mid lagu taageero dakhli oo loo asteeyo barnaamijyada waayeelka. Laakiin waxaa jira mushkilado loo baahan yahay in la xalliyo. Waayeelku waa inay ku noolaadaan Canada ugu yaraan 10 sano si ay xaq ugu yeeshaan helitaanka OAS ama GIS, taasina waxay wax u dhimaysaa taageerada dakhliga ay helaan waayeelka dalka ku cusubi.

Waxay kale oo dhib ka dhigaysaa in uu qofku gaaro da'da sharci ahaan Canada lagu gaaro waayelnimada. Dawladda federalku waxay ka kordhinaysaa da'da waayelnimada ee OAS iyo GIS min 65 ilaa 67 sanadood. Tani waxay waxyeelaynaysaa qof kasta oo jira 57 sano ama ka yar. Waayeelka dakhliga yar ee OAS iyo GIS oo laga sameeyey inta u dhaxaysa 2/3 iyo 3/4 ee dakhliyadooda. Kordhinta da'da xaqsiintu waxay ballanqaadaysaa inay dhib hor leh ku keento jiilalka dambe ee waayellada noqonaya.

Hadda bishaaradu waa in CPP yahay barnaamijka ugu wanaagsan ee Xaqsiin Waayeenimo ee Caam ah. Waa xasillan yahay, qiimo nafci leh, barnaamijkiisana si taxadar leh loo maamulay. Xaqiiqadii, qiyaastii 90% reer Canada waxay jeclaan lahaayeen in dawladda federalka ihi faafiso barnaamijkeenna xaqsiinta waayeenimo ee caamka ah si sare loogu qaado dakhliyada soo gala waayellada. CPP waxay ka cayaari lahayd door aad u ballaaran sidii loo xaqiijin lahaa ammaanka dhaqaalaha, caafimaadka iyo ladnaanta waayellada.

## SU'AALO

1. Waa maxay tallaabada uu xisbigaagu qaadayo si uu uxaqiijiyo inay dhammaan waayelladu helaan dhaqaale sagan kolkay hawl gabaan?
2. Ma taageersan tihii faafinta xaqsiinta hawlgabnimo ee Qorshaha Xaqsiinta Canada?
3. Xisbigaagu ma soo celinayaa sharciga ogolaanaya in lagu gaaro hawlgabnimada 65 jir ee Ammaanka Da'weyn iyo Kabitaanka Dakhliga ee la Ballanqaaday?
4. Muxuu Xisbigaagu samaynayaa si uu sare ugu qaado inay waayaallada dalka ku cusubi heleeli karaan kaalmo dhaqaale ee dakhli?



## ILO:

Faah faahin dheeri ah iyo warqado warbixino saa'ida ayaa ku jira taxaan: <http://spno.ca/canada-votes-2015>

Translated by: African Canadian Social Development Council (ACSDC)



THIS SERIES WAS PRODUCED BY: Canadian Council on Social Development, Community Development Council Durham, Community Development Halton, Edmonton Social Planning Council, Saint John Human Development Council, Social Planning and Research Council of BC, Social Planning and Research Council of Hamilton, Social Planning Council of Cambridge and North Dumfries, Social Planning Council of Kitchener-Waterloo, Social Planning Network of Ontario, and Social Planning Toronto.

**ELECTION DAY: OCTOBER 19, 2015**